


Tallaalka looga hortago bakteeriga pneumococcal

Pneumococci waa bakteeriyada sababta caabuqa sambabaha, caabuqa dhegaha ama sinusitis-ka, laakiin sidoo kale sababa cudurro halis ah sida dhiigga oo sumowga ama caabuuqa xub-maskaxeedka oo dartiisa aad loogu dhinto.



Tallaalka waxaa loogu talinayaa dadka:

- 65 sano jiro ama ka da'weyn
- qaba cudur hoos u dhiga heerka difaaca jirka
- qaato daawooyin hoos u dhiga heerka difaaca jirka
- qaba cudurro ama xaalado sare u qaada khatarka

Maxay tahay sababta aan isku tallaalo?

Dadka badidooda ee la qaadsiiyo bakteeriga Pneumococci kuma xannuunsadaan, laakiin qaar kalena si khatar ah ayay ugu xannuunsadaan. Dadka uu si darran sambabaha ugu dhaco cudurka badanaa waa la dhigaa isbitaal, heerka dhimashaduna waa sarreeyaa.

Sida ugu fiican oo aad ugu badbaadi karto dhibaata bakteeriga Pneumococci waa adigoo iska tallaala.

Bakteeriga Pneumococci waxaa laga helaa sanko iyo dhuunta, siiba wuxuu ku dhaca ilmaha caafimaadka qabo. Waxaa laysku qaadsiiyaa qufaca, hindhisada iwm.

Maaddooyinka tallaalka looga hortago bakteeriga Pneumococci way badan yihiin wayna kala duwan yihiin. Taallaal kasta badbaado fiican ayuu leeyahay. Dhakhtarkaaga ayaa garanaayo nooca kugu habboon.

Ilaa intee jeer ayaa iska tallaala?

Tallaalada waxtar heer sare ayay leeyihiin. Baahida dhamaystirida tallaalka waa hadba nooca maaddada tallaalka lagugu duray. Berri hore caadi ahaan waxaa tallaalka la cusboonisiin jiray lexdii sano hal mar, laakiin waayahaan dambe maaddada la isticmaalo dhamaystirid uma baahna. Haddii aadan hubin haddii aad u baahan tahay tallaal dhamaystirid ah iyo in kale kala xiriir dhakhtarkaaga.

Cudurro kale ma iska tallaali karaa markii aan iska tallaalo bakteeriga Pneumococci?

Tallaalka bakteeriga Pneumococci -, corona- iyo kan influensada islama ayaa layska tallaali karaa, laakiin bakteeriga Pneumococci sannad kasta layma ska tallaalo.


Tallaalka waxyeelo ma leeyahay?

Dareencelisyada xasaasiyada iyo waxyeelada kale ee halista ah marar dhif ah ayay dhacaan.

Halkee ayaa bakteeriga Pneumococci isaga tallaali karaa?

Dhakhtarkaaga waydii halka aad iska tallaali karto ama ka akhriso barta internetka ee Dowladda hoose.

Kooxaha gaar ahaan khatar cudurka u ah, lacag la'aan ayaa lagu tallaala iyadoo loo qoro warqadda ruqsadda oo buluugga ah, laakiin dadka badidooda waa in ay lacag bixiyaan. Markii 65 sano ay buuxsadaan, qiimo-dhimis ayaa lagu tallaalayaa haddii laga faa'iidaysto barnaamijka tallaallada ee dadka waawayn loogu talagalay. Haddii adigoo goobta shaqada ku xusan aad xannuunsato waxaa kharashka bixin doono loo shaqeeyaha.



Warbixin faahfaahsan ka akhriso barta internetka fhi.no/voksenvaksinasjon